

SI TOOS AH ONLINE

# Sawirro aan wanaagsanayn oo ku jira baraha bulshada iyo ciyaaro

**Sida ku cad daraasadda ugu weyn ee dalka ee ku saabsan isticmaalka warbaahinta ee carruurta iyo dhallinyarada, Ungar & medier 2025 ee ay samaysay Hay'adda warbaahintu, dhibaatada ugu badan ee carruurta iyo dhallinyaradu kala kulmaan internetka waxay ka arkaan sawirro argagax leh oo uga soo muuqda baraha bulshada. Sawirradaasi waxay tusaale ahaan muujiyaan dad dhintay oo dagaallo lagu dilay, shilal ama toogashooyin.**


Marka carruurta iyo dhallinyaradu ku arkaan sawirro xun xun baraha bulshada ama ciyaaraha, waxay ku abuuri kartaa dareenno xooggan sida welwel iyo cabsi. Inta badan waxa ku filan in qof weyn, walaal ka weyn ama saaxiib uu muujiyo faham iyo taageero. Qof walba mar ayuu baqaa, arrimaha adagna waa laga wada hadli karaa. Isla markaana, carruurta iyo dhallinyarada qaarkood waxay dareemi karaan dembi ama ceeb ah inay isticmaaleen baraha bulshada ama ciyaaro gaar ahaan haddii dadka waaweyn hore uga muujiyeen welwel arrintaas. Dareenka ay carruurta iyo dhallinyaradu iska dareemaan inay ahayd inay si fiican waxáy ku adkayn kartaa inay raadsadaan caawimo ama taageero.

## Talooyinka loogu talagalay da'da baraha bulshada iyo ciyaaraha

Baraha bulshada, xadka da'da ee hadda ka jira Iswiidhan oo ah 13 sano waxaa loogu talagalay in lagu ilaaliyo xogta gaarka ah iyo asturnaanta carruurta iyo dhallinyarada, halka talooyinka da'da ee ciyaaruhu ay ku saabsan yihiin waxa ku jira ciyaarta. Talooyinka da'du waxay sheegayaan in ciyaartu ay ka kooban tahay waxyaabo keeni kara ama saameyn ku yeelan kara carruurta da'da yar.

**Boqolkiiba inta carruur ah ee ka arka sawirro argagax leh barahooda bulshada**

Xogta/Isha: Dhallinyarada & Warbaahinta 2025 (Ungar & medier 2025), Mediemyndigheten






## Talooyin looga fogaanayo sawirrada dhibaatooyinka leh ee ku dhex jira qulqulka baraha bulshada

- Raac xaddididda da'da, oo dooro baraha bulshada iyo ciyaaraha ku habboon da'daada.
- Isticmaal habaynta waalidka. Waxaad tilmaamo ku saabsan arrintan (hagaha waalidka) ka heli kartaa bogga websaydka ee mediemyndigheten.se
- Kala qaybqaado ilmaha marka uu isticmaalayo baraha bulshada ama uu ciyaarayo ciyaaraha, si aad u fahamto waxa ku dhex jira, ugana wada hadashaan waxa aad arkaysaan iyo waxa aad sameynaysaan.
- Ha ku eedayn ilmaha haddii uu kuu sheego sawirro dhibaabto leh ama khibrado xun oo uu kala kulmay internetka. Haddii kale, ilmuhu kuma dhiirran doono inuu kuu sheego dhacdooyinka kale oo xun xun kuwaas oo dhici kara mar kale. Isdeji oo sii caawi ilmaha.
- Si wadajir ah u baara waxa uu ilmuhu u arkay inay yihiin wax dhibaato leh ama xun, kana wada hadla sida iyo sababta ay ugu abuurtay dareenkaas. Ku heshiiya sidii looga fogaan lahaa waxaas iyo waxa lagu beddeli karo ee wanaagsan.
- Haddii aad aragto nuxur dhibaato leh ama sharci-darro ah oo ku jira baraha bulshada ama ciyaaraha, waxaad sida uu qabo Sharciga Adeegyada Dhijitaalka ah (Digital Services Act) ka codsan kartaa boggagaas inay ka saaraan ama xaddidaan helitaanka nuxurkaas adigoo gudbinaya dacwad. Sidoo kale, waxaad cabasho u gudbin kartaa Hay'adda boostada iyo Isgaarsiinta haddii adeeggu aanay fulin shuruudaha uu sharcigani dhigayo

wax loo arko in aanay ku habboonayn carruurta iyo dhallinyarada ka yar da'da la cayimay. Ciyaaraha kumbuyuutarka ee lagu iibiyo Midowga Yurub (EU), waxaa laga heli karaa talooyinka da'da oo heerarkoodu kala yihiin: 3, 7, 12, 16 iyo 18 sano. Xadidida da'du waxay ku salaysan tahay heshiis ay gaareen shirkadaha ciyaaraha waxaan soo saara ururka la yiraahdo PEGI. Waxay kaloo ciyaaraha ku calaamadiyaan astaamo muujinaya rabshada, luqadda xun, naxdinta, khamaarka, galmada daroogada, takoorida iyo suurtagalnimada in ciyaarta dhexdeeda wax laga iibsado. Tani waxay dadka waaweyn siinaysaa muuqaal guud oo ku saabsan waxa ay ciyaartu ku saabsan tahay iyagoon iyagu ciyaarin, sidaas darteedna waxay u oggolaanaysaa inay go'aan ka gaaraan ciyaaraha ku habboon ilmaha. Ilaha kale ee waxtarka leh waa kollaspelet.se, oo bixiya macluumaad ku saabsan dabinada lacagta iyo sida ciyaaraha caanka ah loo kasbado (monetization), sidoo kale waxay ka hadashaa khataro kale, tusaale ahaan noocyada kala duwan ee naqshadeynta marin-habaabinta, taas oo muhiim ah in la ogaado.

---

Websaytka Hey'adda warbaahinta waxaad ka heli kartaa talooyin fudud, taageero iyo agab ku saabsan caadooyinka isticmaalka warbaahinta ee carruurta iyo dhallinyarada – kuwaas oo loogu talagalay dadka waaweyn iyo carruurta labadaba.

Webbplatska **Hay'adda warbaahinta** waxaad ka heli kartaa talooyin fudud, taageero iyo agab ku saabsan caadooyinka isticmaalka warbaahinta ee carruurta iyo dhalinyarada, kuwaas oo loogu talagalay dadka waaweyn iyo carruurta labadaba.

**Safer Internet Centre Sverige** (Xarunta Internetka ee Ammaanka) Iswiidhan) waa dadaal wadajir ah oo loogu talagalay badbaadada carruurta iyo dhalinyarada ee internetka. Hay'adda warbaahinta ayaa maamusha xaruntan iyadoo kaashanaysa ururada xuquuqda carruurta u dooda ee Bris iyo ECPAT.